**IYO**

4. **Aad tahay qof akhlaaq wanaagsan.** Ogow: waxyaabaha qaarkood, sida qaar ka mid ah dambiyada la isku helo waxa ay kaa hor istaagi karaan muujinta ah inaad tahay qof wanaagsan. Qareen arrintaada kala tasho si uu u eego xaaladaada.

Haddii aad xareysanayso sharci helid ku salaysan tacadi uu horey kuu geystay qof aad isqabteen laakiin aad hadda aad is furteen qofkaa ama uu dhintay, kolkaa waxa aad haysataa 2 sanno si aad u codsato sharcigaa. Waa khasab inaad u soo gudbiso codsi I-360 ah iyo qoraalada laanta socdaalka (immigration) si kolkaa ay u helaan wax walba ka hor inta uusan furiinku labo sanno jirsan ama xilihu uusan sii mootanayn muddo ka badan 2 sanno.

Foomka I-360 waxaa dhici <u>karta</u> in laguu ansixiyo xataa hadii:

- Tacadigu uu dhacay dibada Mareykanka (U.S.)
- Xiriirkii labada qof uu dhmaaday iyadoo sababtu tahay geeri ama furiin 2-dii sanno ee la soo dhaafay
- Wali aad la nooshahay qofka aad isqabtaan ama qaraabada kugu tacadiya
- Qofka aad isqabtaan ee kugu tacadiyaa uu horey u wada qabi jiray xaasaska hal ka badan
- Xilaha tacadiga gaysta ama qaraabadiisu laga qaaday sharcigii 2 dii sanno ee la soo dhaafay gudahooda sababtoo ah tacadigii ay adiga kuu geysteen aadana dib u guursan

## Manfacyada

Xataa ka hor inta aan arjiga I-360 la ansaxin, waxaa dhici karta inaad hesho manfacyada dowladu bixiso sida, MFIP, MA, iyo cunto. Waxaa iyana sidoo kale dhici karta inaad hesho ruqso shaqo.

Hadii arjigaaga I-360 la ansaxiyo, waxa aad heli kartaa:

- "Dib u dhigid musaafurintaada ah." Taa macnaheedu waa laanta socdaalku waxa ay kiiskaaga gelisaa kuwa mudnaanta hoose leh kolka ay noqoto saarida (masaafurinta).
- Inaad codsato warqad shaqo.
- Inaad codsato Sharci Deganaansho Rasmi ah. La hadal qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaal (immigration) si aad u hubsato inaad xaq u leedahay ka hor xareynta.
- Inaad u codsato sharci ama martabo siin qaar ka mid ah xubnaha qoyskaaga.

## ➢ Arjiga I-751 ee Ka Qaadidad Shuruudaha Sharciga Dehanaanshaha ah

Hadii aad guursato Muwaadin Mareykan (U.S.) ah ama Deganaansho Rasmi ah, waxaad heli kartaa sharci deganaansho ah oo aad ku qaadato guurka. Hadii guurkaaga uu jiray muddo ka yar 2-sanno, waxa lagu siin **sharciga deganaanta shuruudlaha** ah intii lagu siin lagaa sharci Deganaansho Rasmi ah. Sharciga Deganaanta shuruudalaha ahi waxa uu jiraa 2-sanno kolkaa kaarka deganaanta shuruudlaha ahi waxa uu shaqeyn uun **2-sanno** (marmarka qaarkood waxaa loogu yeeri "sharciga labada sannadlaha ah." **Sharciga deganaanta ee shuruudlaha ahi waa uu ka duwan yahay kan daganaanshaha rasmiga ah.** Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ahi ma uu dhaco. Kaarka Deganaanshaha Rasmiga ahi waxa uu shaqeeyaa **10 sanno** kolkaa ka dib waa in la bedelo.

Hadii aad haysato sharci daganaansho shuruudle ah aadna doonayso inaad sharci Deganaansho rasmi ah aad qaadato, xareyso arjiga Foomka I-751, oo ah Arji looga Qaado Shuruudaha Deganaanta. **Ogow:** Deganaha shuruudlaha ahi MA AHA foomka I-90. Hadii wali aad qofkii isqabtaan 2 diinu waxa aad wada jir u xareysanaysaan foomka I-751 xiliga 90-cisho ah ee ah ka hor waqtiga dhicida kaarka deganaanta shuruuda leh ah.

Laakiin, hadii qofka aad isqabtaani uu tacadi gayste yahay ama caafid ahaan uu kuu xasdo, ama hadii guurkii uu dhamaaday, kolkaa waxaa aad xareysan kartaa Foomka I-751 kaligaa. Waxaa roon in la xareeyo ka hor inta uusan kaarku dhicinHaddii aad adigu kaligaa aad xareysanayso, uma baahnid inaad sugto ilaa 90 cisho ka hor inta kaarku uusan dhicin. Kiisaska qaarkood, waxaa dhici karta inaad xareysan karto ka dib kolka uu kaarka deganaanta shuruudlaha ahi uu dhaco.

Xataa haddii kaarku uu dhaco, wali farsamo ahaan waxaa aad leedahay sharci deganaansho ah oo shuruudle ah. Haddii aadan xareysan arjiga I-751 ka hor inta uusan kaarku dhicin, waxaa lagaa saari karaa wadanka ama waxaa laguu gudbin karaa maxkamada laanta socdaalka (immigration) ee wadanka dadka ka saarta.



## Xaq u yeeladka

Hadii aad kaligaa aad xareysay Foomka I-751 by sababtoo ah dagaal qoyska dhexdiisa ah ama xaqdi dhanka caadifada ah, waa inaad cadeyso:

1. In guurkaagu uu sax iyo sharciba ahaa.
2. Guurkaagu inuu "xalaal ahaa." Taa macnaheedu waa waxa aad u baahan tahay inaad keento cadeyn ah inaadan u guursan qof kaliya ujeeda ah inaad sharci ku qaadato.
3. Tacadi ama cadownimo maskaxda ah oo uu kuu geystay qofka aad isqabtaan.

Hadii aad is furteen qofkii kale, wali waa aad xareysan kartaa Foomka I-751. Hadii tacadigu uu ahaa ka hor, waa ay ku caawin inaad sharaxdo in lagugu tacadiyey. Sii cadeymo ku saabsan tacadiga iyo furiinka laanta socdaalka.

Sidoo kale waxa aad isticmaali kartaa Foomka I-751 hadii qofkii aad isqabteen uu geeriyooday ama hadii ku noqoshada wadanka aad u dhalatay ay kuu keeni karto adiga inay ku soo gaarto dar-xummo aad u balaaran.

## Manfacyada

Hadii Foomka I-751 la ansaxiyo iyadoo sababtu tahay tacadi ama xaqdi caadifada ah, waxa aad heli:

- Sharci Daganaansho Rasmi ah
- Fursad aad ku codsato muwaadinimo 3-sanno oo daganaansho ah ka dib haddii xilahaagu uu yahay muwaadin Mareykan (U.S.) ah

